



Jadwalada Iskuulka ee Labada Todobaad ee ugu Horeeya

Ogosto 21, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Waxaan jecelnahay in aad idinla wadaagno macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan labada todobaad ee iskuulka ugu horeya, sidoo kalena aad idin xasuuusino in aan xooga saareyno sidii la iskugu xirnaan lahaa ardayga guriga joogta iyo macallinka, wacyi-galin iyo taageerida shucuurta bulshada. Jadwaladani waxaad ka heli kartaa “soft start” 2020-21, kuwaasi oo bilaabmaya maalinta Arbacada, Sebtambar 2deeda, marka aad [gujiso halkan](#).

Ujeedadda “soft start” ee jadwaladu waxa ay siineysaa macallimiinta, waalidiinta, qoysaska iyo ardayda fursad ay ku kobciyaan xiriirka, sidoo kale ay wax badan uga ogaadaan hababka iyo qalabka loo isticmaalo marka guryaha ardaydu waxbarashada ku qaadanayaan, iyo waliba sidii loo dhisi lahaa fasalo muuqaal baahiyaha ka baxaya oo dhaqan ahaan waafaqsan. In fursad la siiyo ardayda sidii ay u kobcin lahayaan murtida maalin laha, barashada hawla shucuurta bulshada oo ay ka mid noqon doonaan iyada oo maalin walba ardayda la xaadirin doono.

Iyada oo aan ku bilaabeyno sanad-dugsiyeedkan Waxbarashada Ardaydu Guryaha ku Qaadanayo oo Dhammeystiran ilaa laga gaarayo bisha Noofembar 5teeda, waxa aad arki doontaa erey bixin cusub aanad hore u arag. Si loo cadeeyo faraqa u dhaxeeya waxbarashada waxbarashada toos u socoto iyada oo lagu qaadanayo muuqaal iyo waxbarashada online ama hore loo sii duubay lagu qaadanayo, fadlan waxaa [gujisaa halkan](#) sidii aad uga heli l ahayd sharaxaad iyo tusaalayaal ku caawiya sidii aad u fahmi lahayd.

Waxa aan rajeyneynaa in rubuca ugu horeeya iskuulka ay yeeshaan jadwal maalin walba, heer kasta oo fasalada, iyada oo ay qoysasku heli doontaan jadwalkaasi todobaadka soo socda. Fadlan waxaad booqataa pps.net/fall2020 si aad u hesho wararkii ugu dambeeyey ee ku saabsan furitaanka sanad-dugsiyeedka iyo su'aalaha inta badan la isweydiyo.

Si kastaba ha ahaatee, waxaan iduin rejeyneynaa caafimaad qab iyo inaad ku raaxaysataan maalmaha ka hadhsan fasaxa xaggaaga.